

Ogolaanshaha Dhinac Saddexaad (Third Party Authorization)

- "Aniga" iyo "kuwayga" waxaa loola jeedaa oo ay u taagantahay si gaar ah iyo si wadajir ahba milkiilaha iyo qofka la leh (haddii ay jiraan) ee hoos ku qoran, iyo qofka kasta oo amaahday aan mulkiilaha ahayn ee hoos lagu tilmaamay.
- "Adeege" macneheedu waa dayn bixiyaha/adeegaha ugu horreeya ee amaahda guriga.
- "Dhinac Saddexaad" waxaa loola jeedaa si gaar ah iyo si wadajir ahba dhinacyada saddexaad (ay ku jiraan shaqaalahooda, qandaraaslayaasha, qandaraas-hoosaadlalyaasha, wakiillada, beddelka, iyo kuwa loo xilsaaray).

Waxaan u fasaxayaa adeegaha iyo cidkasta oo Saddexaad inay helaan, wadaagaan, sii daayaan, ka wada hadlaan, iyo haddii kale ay isu gudbiyaan midba midka kale macluumaadkayga gaarka ah ee dadweynaha u furan iyo kuwa aan dadwanaha u furnaynba ee ku jira ama la xiriira deymaha amaahda guryaha, sharciyada caymiska iyo khidmadaha la xiriira, canshuurta iyo waajibaadka lacag bixinta mulkiilaha guriga. Macluumaadkan waxaa ku jiri kara (laakiin aan ku xaddidnayn) magaca, cinwaanka, lambarka taleefanka, lambarka sooshal sakuuratiga, dhibcaha deynta, warbixinta deynta, dakhliga, macluumaadka dabagalka dawladda, loss mitigation application status, baaqiga ku jira akoonada, u qalmitaanka barnaamijka, iyo hawsha lacag bixinta ee mulkiilaha iyo amaahdaha aan mulkiilaha ahayn. Waxaan sidoo kale fahansanahay oo aan ogolaaday siidaynta macluumaadkayga gaarka ah iyo shuruudaha arjiyada, heshiisyada, ama xiriirada kale ee hoos yimaada Barnaamijyada Sanduuqa Kaalmada Mulkiilaha Guriga ee Adeegaha ama State HFA ee Waaxda Hanti-dhowrka Mareykanka ama wakiiladooda ee la xiriira mas'uuliyadaha hoos yimaada Xeerka Qorshaha Samatabbixinta Maraykanka ee 2021.

Adeegaha iyo Dhinac kasta oo Saddexaad ayaa loo ogolaaday inay qaadaan tallaabooyinkan oo kale iyadoo hadba sida loogu maleeyo inay macquul u tahay si loo xaqiijiyo aqoonsiga Dhinac Saddexaad laakiin ma laha mas'uuliyad ama damaanad ay ku xaqiijiyaan aqoonsiga Dhinaca Saddexaad. Adeeguhu sidoo kale ma leh mas'uuliyad ama kama aha mas'uul waxa ay dhinac saddexaad ku sameeyaan macluumaadkaas.

Kahor intaadan saxiixin Ogolaanshahan Dhinac Saddexaad, ka digtoonow khiyaanada la xiriirta samatabbixinta guri la wareegida!

- Lataliyaha guryeynta ee ay ogolaatay HUD, wakiilka HFA ama dhinac saddexaad oo kale oo u idman ayaa si toos ah ula shaqayn kara adeeg bixiyaha qofka guriga amaahda/adeegaha amaahda.
- Mulkiiluhu wuxuu booqan karaa <https://www.hud.gov/findacounselor> si uu u helo hay'ada la-talinta guryeynta ee ay ogoshahay HUD.
- Ka digtoonow qof kasta oo ku weydiista lacag si uu kuugu qabto adeega la-talinta ama wax ka beddelka deynta xilligeedii aad kala daahday.

Dhammaan milkiilayaasha iyo amaahdayaasha aan mulkiilaha ahaynba waa inay saxeexaan Ogolaanshahan Dhinac Saddexaad. Oggolaanshahan dhinaca Saddexaad lagama laaban karo marka laga reebo sida uu sharcigu dhigayo.

WAAN FAHMAY OO WAAN OGOLAHAY SHARJUUDAHA OGOLAANSHAHA DHINAC SEDDEXAAD:

Fadlan isticmaal meelaha loogu talagalay saxeexida codsadhaha ee ku yaalla bogga kowaad ee dukumeentigan si aad u saxiixdo foomkan. Waxaad bixin doontaa saxiixaaga, magaca oo qoran, iyo taariikhda.